XAFIISKA AGAASIMAHA
Kate Brown, Guddoomiyaha Gobolka ama Badhasaabka

Oregon Health Authority

500 Summer St NE E20
Salem OR 97301
Codka: 503-947-2340
Faakiska: 503-947-2341

Isha Joogitaanka Ugu badan ee COVID-19

Ishaan waxay siineysaa ganacsiyada warbixinta ku saabsan sida loo go'aansado "Xadeynta Tirada Ugu badan" ee COVID-19 iyada oo lagu shaqeynayo gudaha Jadwalka Hagida Heerka Halista Waaxda.

Waa inaad kowdii go'aansataa tirada daganaanshaha guud ee ganacsiga, taas oo laga helo Xeerka Dabka (OFC), Aaga SAgxadda La ogolaan karo ee Dagahiiba oo fiit afargees ah, Jadwalka 1004.5. Tirada dagayaasha waxaa loola jeedaa tirada dadka loo ogolyahay dhismaha oo halkii marba sida ku saleysan booska dhismaha sagxadda iyo shaqada, sida tirada dadka laga ogolyahay dhismaha uu ku saleysanyahay qaababka ka bixida (wadooyinka ka bixida).

Tiradaada daganaanshaha guud waxaa ku jirayo labadaba xubnaha shaqaalaha iyo macaamiisha ganacsiga. Wixii caawin dheeraad ah oo sida loo go'aansado waxa tirada daganaanshaha ganacsigaaga guud yahay, ka hor isku darka iyo go'aansashada waxa COVID-19 "Xadeynta Tirada Ugu badan" ay tahay, fadlan kala xiriir wakaalada dabka deegaanka ee maamulka ku leh aagaaga.

Waxay ahaaneysaa masuuliyada ganacsi walba go'aansiga iyo taageeridda xisaabinadooda ee "Xadeynta Tirada Ugu badan" COVID-19 sida lagu hagay Jadwalka Hagida Heerka Halista Waaxda. Wakaalada dabka deegaanka ayaa kugu caawin karta go'aansashada tirada daganaanshaha guud, laakin uma suurtogaleyso taageerida codsiyada boqolkiiba xisaabinada lagu go'aansanayo yareynada looga baahanyahay "Xadeynta Tirada Ugu badan" COVID-19.

Liiska Wakaalada Adeega Dabka Deegaanka Oregon iyo warbixinta xiriirkooda waxaa laga heli karaa halkaan:
https://www.oregon.gov/osp/programs/sfm/Pages/Fire-Agency-Contact-List.aspx

Magacyada la gaabiyay:

- **"GLA"** waxaa loola jeedaa Aaga La kireysan karo ee Guud
- **"OLF"** waxaa loola jeedaa Xaqiiqda Tirada Daganaanshaha
- **"sf"** waxaa loola jeedaa fiit Afargees ah

Qeexitaano:

- **"Go'aanashada tirada daganaanshaha guud ee Xeerka Dabka Oregon (OFC)"** waxaa loola jeedaa in tirada daganaanshaha lagu go'aansado u qeybinta midkood aaga sagxadda guud ama go'an (sf) ee booska oo qeybta tirada daganaanshaha (fiiri jadwalka 1004.5).

- **“Aaga sagxadda, guud”** waxaa loola jeedaa aaga sagxadda ee ku jiro gudaha wareega banaanka darbiyada dhismaha sida waafaqsan tixgelinta, gaar u ah qafisyada hawada iyo dhismooyinka, iyada oo aan laga jarin marinada, jaranjarooyinka, buurta jidka, armaajooyinka, qaraweynida darbiyada gudaha, qeybaha ama muuqaalada kale. Aaga sagxadda ee dhismaha, ama qeybta halkaas, ee aan lala bixin darbiyada banaanka ku haraareysan waa inay ahaataa aaga la isticmaali karo sida waafaqsan saadaalinta jiifka ee saqafka ama sagxadda kore. Aaga sagxadda guud waa inaysan ku jirin qafisyada aan la heyn furnaansho ama dhismaha gudaha.
- **“Aaga sagxadda, go’an”** waxaa loola jeedaa aaga dhabta loo daganyahay oo aan ku jirin aagaga ku darista aan la daganeyn sida marinada, jaranjarooyinka, buuraha jidka, qolalka musqusha, qolalka farsamada iyo armaajooyinka.

Go'aansiga waxa tirada daganaanshaha ganacsigaaga guud yahay sida waafaqsan Xeerka Dabka Oregon

Waa maxay isticmaalkaaga ganacsi?

Xarumaha cunista iyo cabitaanka: Kuwaan waxaa loo tixgeliyaa daganaanshaha **Usu imaanshaha** oo OFC giiba ah.

- Iyada oo aan jirin fadhiyo go’an 15 fiit afar gees qofkiiba. Wixii kuraas go’an ah, xisaabi tirada dhabta ah ee fadhiga go’an. Wixii teendhooyinka, isticmaal hal qof oo 24 inji walba oo dhirirka teendhada.

Machadyada diimaha, guryaha tacsida, qolalka meydka, qabuuraha: Kuwaan waxaa loo tixgeliyaa daganaanshaha **Usu imaanshaha** oo OFC giiba ah.

- Booska joogsiga 5 fiit afar gees aaga go’an qofkiiba;(kuraas kaliya) 7 fiit afar gees aaga go’an qofkiiba ee ururs an. Wixii kuraasta ama kuraasta dheer, isticmaal hal qof oo 18 inji walba ee dhirirka kursiga ama kursiga dheer.

Xarumaha madadaalada gudaha: Kuwaan waxaa loo tixgeliyaa daganaanshaha **Usu imaanshaha** oo OFC giiba ah.

- Booska joogsiga 5 fiit afar gees aaga go’an qofkiiba(kuraas kaliya) 7 fiit afar gees aaga go’an qofkiiba ee ururs an. Wixii kuraas go’an, xisaabi tirada dhabta ah ee fadhiga go’an.

Xarumaha/moolalka adeegashada gudaha iyo banaanka: Kuwaan waxaa loo tixgeliyaa daganaanshaha **Ganacsiga** oo OFC giiba.

- Ganacsiga: Qeybta tirada daganaanshaha (OLF = 0.00007)(GLA) + 25.

Xarumaha madadaalada iyo jirdhiska gudaha: Kuwaan waxaa loo tixgeliyaa daganaanshaha **Usu imaanshaha** oo OFC giiba ah.

- Joogsiga booska 5 fiit afar gees ah aaga go’an qofkiiba. Qolalka jimicsiga 50 fiit afar gees aaga guud qofkiiba.

Waa maxay isticmaalkaaga ganacsi?

Xafiisyada: Kuwaan waxaa loo tixgeliyay daganaanshaha **Ganacsiga** oo OFC.

- 150 fiit afar gees ah aaga guud qofkiiba.

Xarumaha madadaalada iyo jirdhiska banaanka: Kuwaan waxaa loo tixgeliyaa daganaanshaha **Usu imaanshaha** oo OFC giiba ah.

- Joogsiga booska 5 fiit afar gees ah aaga go'an qofkiiba.

Xarumaha madadaalada banaanka: Kuwaan waxaa loo tixgeliyaa daganaanshaha **Usu imaanshaha** oo OFC giiba ah.

- Booska joogsiga 5 fiit afar gees aaga go'an qofkiiba; (kuraas kaliya) 7 fiit afar gees aaga go'an qofkiiba ee ururs an.

Dukaamada tafaariiqda: Kuwaan waxaa loo tixgeliyaa daganaanshaha **Ganacsiga** oo OFC giiba.

- 60 fiit afar gees ah aaga guud qofkiiba.

Tusaalooyinka sida loo go'aansado COVID-19 "XADEYNTA TIRADA UGU BADAN" sida ku saleysan heerarka halista kala duwan:

S: Maqaayada ku taalo qeybta Halista Sareyso ee leh tirada daganaanshaha cashada gudaha oo 260 qofood.

J: Ugu badnaan 50 qof gudaha. (260)(.25%) = 65 qofood > 50. Tirada dadka gudaha waa inaysan dhaafin boqolkiiba 25% ugu badnaan daganaanshaha ama 50 qofood, mid walba oo ugu yar.

S: Dukaanka tafaariiqda ku yaalo qeybta Halista Dhexaadka ah oo leh tirada daganaanshaha oo 500 qofood ah.

J: Ugu badnaan 250 qofood gudaha. (500)(.50%) = 250 qofood. Qaadashada dhinaca laamiga lagu dhiirogeliyay.

S: Kaniisada ku taalo qeybta Halista Daran oo leh tirada daganaanshaha gudaha oo 350 qofood.

J: Ugu badnaan 88 qofood gudaha. (350)(.25%) = 87.5 [dheh 88]. Tirada dadka gudaha waa inaysan dhaafin boqolkiiba 25% ugu badnaan daganaanshaha ama 100 qofood, mid walba oo ugu yar.

Helitaanka dukumiintiga: Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriisi, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, far waaweyn, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us